

FAQs (Su'aalaha Inta Badan la Waydiiyo) Sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore

Macluumaadka lacag bixinta

1. Goorma ayay lacag bixintu bilaabanaysaa?

Toos akoonka ugu shubista ACH (automated clearing house) waxay bilaaban doontaa Oktoobar. 5, 2022.

Lacagaha kaarka lacagta lagu shubo ee ReliaCard ee la codsaday wakhtigii arjiga, ReliaCard waxa la bilaabayaa in la howlgeliyo Oktoobar 5, 2022. U ogolow ilaa saddex toddobaad soo dirista iyo keenista

Toos bangiga ugu shubista ACH

2. Maxaa dhacaya haddii macluumaadkayga bangigu uu khaldan yahay?

Haddii toos bangiga ugu shubista lagu guul darraystay, waxaad heli doontaa fariin email ah oo ay ku jiraan tilmaamo si aad u cusboonaysiiso macluumaadka bangigaaga. Waxaad haysan doontaa ilaa 5 p.m. (CT), Oktoobar. 21, 2022, si aad u cusboonaysiiso macluumaadka akoonkaaga bangiga.

3. Immisa isku day lacag bixin ah ayaa la samayn doonaa?

Waxaan isku dayi doonaa toos bangiga in aan ugu shubno laba jeer. Haddii toos ugu shubista akoonka weli lagu guulaysan waayo isku dayga labaad kadib, waxaanu kuugu soo diri doonaa lacagta oo dhan kaarka lacagta lagu shubo ee ReliaCard ee U.S. Bank anagoo adeegsanayna ciwaanka arjiigaaga. Isku dayga ugu horreeya waxa la samayn doonaa Oktoobar 5, 2022; isku dayga labaad waxaa la samayn doonaa Oktoobar 26, 2022. Haddii labada isku dayba ay guuldarraystaan, kaarka ReliaCard ayaa la soo diri doonaa Noofembar.

4. Sidee degdeg ah ayaan ugu heli doonaa lacagtayda ACH?

Haddii lacag akoon ku shubista ACH lagu guulaysto, waxaad heli doontaa lacagtaada shan maalmood oo shaqo gudahood kadib marka lacag bixinta la bilaabo.

5. Sideen ku arki karaa xaalada uu marayo arjigayga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore ee Minnesota?

Si aad u aragto xaalada uu marayo codsigaagu, booqo frontlinepay.mn.gov ka dibna gal akoonkaaga.

6. Sideen ku heli karaa caawimo?

Si aad u ogaato xaalada kaarka ReliaCard, wac adeegyada kaar haystaha ee US Bank 855-282-6161.

Kaararka Lacagta lagu shubto ee ReliaCard

7. Sideen u eegi karaa xaalada soo dirista ee ReliaCard?

Si aad u ogaato xaalada kaarka ReliaCard, wac adeegyada kaar haystaha ee US Bank 855-282-6161. Waxaa lagu weydiin doonaa lambarka taleefanka ee ku xiriirsan akoonkaaga si sahlan si loogu galo. Haddii aad doorato inaad la hadasho wakiilka, waxay codsan doonaan macluumaadka kugu saabsan si ay u xaqiijiyaan aqoonsigaaga kahor intaysan bixin wax macluumaad ah.

8. Maxaan sameeyaa haddii aanan helin kaarkayga ReliaCard?

Haddi aanad helin kaarkaaga Reliaka ugu dambayn Oktoobar. 28, 2022, waxaad ka wici kartaa adeegyada kaar haystaha US Bank 855-282-6161. Wakiiladani waxay awood u yeelan doonaan inay kuu sheegaan in kaarkaaga la soo diray iyo ciwaanka loo soo diray. Si aad u hesho macluumaadkan, waxaa lagu weydiin doonaa inaad xaqiijiso aqoonsigaga. Haddii aad wacdo si aad uga warbixiso kaarkaaga ReliaCard uu lumay ama la xaday, waxa lagaaga baahan doonaa in aad damiso kaarka si aad wax talaabo kale oo dheeri ah u qaado.

9. Haddii kaarka ReliaCard loo soo celiyo ciwaan khaldan darteed, ma la ii soo sheegi doonaa in la ii keeni kari waayay?

Maya, laguuma soo sheegi doono Haddii kaarka loo soo celiyo ciwaan khaldan darteed, codsaduhu waa inuu soo waco adeegyada kaar haystaha ee U.S. Bank 855-282-6161. Dhammaan codsadyaasha ku codsaday lacag bixinta ReliaCard waa inay sugaan ilaa kadib Oktoobar 28, 2022, in ay u wacaan si ay u ogaadaan xaalada ReliaCard.

10. Sideen ugu cusbooneysiisaa macluumaadka cinwaankayga U.S. Bank?

Si aad u cusboonaysiiso macluumaadkaaga ciwaanka, ka gal akoonkaaga khadka internetka ah usbankreliacard.com ama ka wac adeegyada kaar haystaha ee US Bank 855-282-6161. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo macluumaad si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga.

Haddii aad guurto oo aad buuxisay foomka beddelka cinwaanka ee Adeega Boosta Maraykanka, waraaqahaaga, oo uu ku jiro ReliaCard, ayaa laguugu soo gudbin doonaa cinwaankaaga cusub.

11. Immisa jeer ayey U.S. Bank isku dayi doonaan inuu dib u soo sameeyaan kaararka ReliaCards?

US Bank si toos ah uma soo dirto kaarka beddelaada ah ama lama xiriirto codsadaha haddii ay jiraan xaalado keenista la xiriira oo sii socda. Si aad caawimo u hesho, wac adeegyada kaar haystaha US Bank 855-282-6161.

12. Sideen u daaran karaa kaarkayga ReliaCard?

Si aad u daarato kaarkaaga ReliaCard, waa inaad hayso kaadhkaaga. US Bank sidoo kale waxay u baahan doonaan:

- Afarta lambar ee u dambeeya ee lambarka sooshal sakuuratiga codsadaha; iyo
- saddexda lambar ee CV2 ee ku yaalla dhabarka kaarka.

Kaarkaga waxa aad ku daaran kartaa khadka internetka usbankreliacard.com ama adiga oo wacaya lambarka talefoonka ee xaga dambe ee kaarka ku yaalla si aad u hesho caawimo.

13. Ma jiraan khidmado lagu soo dallacayo dib u soo samaynta ReliaCard?

Bedelaada kaarka ReliaCard sanadka ugu horeeya gudihiisu waa bilaash. Sannadka ugu horreeya kadib, khidmada beddelaadu waa \$5.

14. Muddo intee le'eg ayay qaadanaysaa in dib loo soo sameeyo ReliaCard?

Waxay qaadataa ilaa 10 maalmood oo shaqo in dib loo soo sameeyo ReliaCard.

15. Si degdeg ah miyaan u codsan karaa kaar beddelaad ah?

Haa, waxaad codsan kartaa kaar beddelaad ah oo degdega ah iyadoo lagaa qaadayo \$15 khidmad ah.

16. Intee in le'eg weeyaan ka hor inta aan lacagta loo dirin hanti aan la sheegan?

U.S. Bank dib ayey lacagaha laga tegey ugu wareejisaa mas'uuliyiinta gobolka iyadoo lagu salaynayo Gobolka degenaanshaha. Minnesota waa saddex sano. Wisconsin waa shan sano.

17. Miyaan u baahanahay inaan sugo ilaa ReliaCard la soo celinayo kahor intaan cusbooneysiin ciwaankayga?

Kadib marka US Bank ay diiwaangeliso kaarkaaga, waxaad ka bedeli kartaa ciwaankaaga wakhti kasta akoonkaaga khadka internetka ah ama adiga oo ka wacaya adeegyada kaar haystaha ee US Bank 855-282-6161.

18. Sideen ku helaa kaar beddelaad ah?

Haddii aad u baahan tahay kaarka beddelka, waxaad kala xiriiri kartaa adeegyada kaar haystaha ee US Bank 855-282-6161. Dadka kaarka haysta waxa kale oo ay kaarka beddelaada ah ka heli karaan website-ka kaar haystaha ee usbankreliacard.com.

19. Sideen u cusbooneysiisaa cinwaanka ama magaca kaarkayga?

Si aad u cusboonaysiiso macluumaadkaaga, booqo usbankreliacard.com ama la xiriir adeegyada kaar haystaha ee U.S. Bank adiga oo isticmaalaya lambarka talefoonka ee ku yaalla gadaasha kaadhka.

Xisaabinta lacag bixinta

20. Sidee loo xisaabiyay lacag siinta codsade kasta oo u qalma?

\$500 ta milyan ee loo qoonseeyey lacagsiinta shaqaalaha safka hore waxa loo qaybiyay wadarta tirada codsadayaasha loo helo tirada lacag bixinta codsade kasta oo helayo. Lacag kasta waxaa lagu soo koobay \$.05 ugu dhow.

- Qoondaynta Lacag siinta Shaqaalaha Safka hore: \$500,000,000
- Wadarta codsadayaasha la ogolaaday: 1,025,655
- Lacagsiinta codsade kasta oo xaqa u leh: \$487.45

21. Lacag intee dhan ayaa ka harsan barnaamijka Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore?

Waxa jiray 1,025,655 codsade oo loo ogolaaday Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore. Ka dib marka lagu soo koobo lacag bixin kasta \$487.45, waxaa soo hartay \$44,470.

22. Maxaa lacagta soo hartay loo isticmaali doonaa?

Lacagaha soo hartay waxaa lagu hayn doonaa kayd, taas oo ah habdhaqanka caadiga ah ee hawlaha ganacsiga. Barnaamij leh baaxadan lacag bixinta oo kale, lacagahan ayaa loo adeegsan karaa haddii ay dhacdo xaalad aan macquul ahayn ee laga yaabo inay soo baxdo inta lagu jiro qaybinta lacagaha.

23. Dadku weli rafcaan ma ka qaadan karaan diidmada?

Maya, sharciga Lacagsiinta shaqaalaha Safka hore ayaa loo ogolyahay 15 maalmood oo rafcaan ah wuxuuna dhigayaa in go'aannada rafcaanku ay yihiin kuwa kama dambaysta ah. Muddada rafcaanka ee 15-ka maalmood ah waxay ahayd Agoosto. 16 ilaa 31 (ugu dambayn 5 p.m. CT).